Macluumaadka Adeegyada Dabacsan ee loogu talagalay Xubnaha ka tirsan Qorshaha Caafimaadka Oregon ee ku jira Daryeelka Urruradu Iska kaashadeen

Haddii aad tahay xubin ka tirsan Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) oo isqoray daryeelka urruradu iska kaashadeen (CCO), waxaad awoodi kartaa in aad hesho waxyaabo ama adeegyo aanan ahayn kuwa caadiga ee faa'iidooyinka OHP, laakiin waxay taasi kaa caawin kartaa in aad ku sugnaato caafimaad ama noqoto qof caafimaad qaba. Kuwani waa adeegyo dabacsan waxayna qayb ka yihiin barnaamij ballaaran oo loo yaqaano adeegyada la xiriira caafimaadka. Adeegyada dabacsan ma heli karaan xubnaha ka tirsan OHP ee haysta Kaarka Furan ee OHP.

Su'aalaha Inta badan La iska Isweydiiyo Adeegyada Dabacsan

Waa maxay adeegyada dabacsan?

Adeegyada dabacsan waa waxyaabo iyo adeegyo kaa caawin kara in aad ku sugnaato caafimaad ama noqoto qof caafimaad qaba.

- Waxyaabahani ama adeegyadani sida caadiga ah laguma daro faa'iidooyinkaaga Qorshaha Caafimaadka Oregon.
- Tusaalooyinka adeegyada dabacsan ayaa ku qoran bogga labaad.

SHURUUDAHA QORSHAHA CAAFIMAADKA OREGON

Rafcaanka: Marka aad codsato in qorshahaagu dib u eegis ku sameeyo go'aan ay ka gaareen daboolista adeega daryeelka caafimaad. Haddii aadan ku raacsaneyn go'aanka qorshuhu gaaray, rafcaan ayaad ka qaadan kartaa isaga oo codsan kartaa in go'aanka dib loo eego.

Faa'iidooyinka: Adeegyada uu qorshahaaga daryeelka caafimaadku lacagtiisa bixiyo.

Daryeelka Urruradu Iska kaashadeen (CCO): CCO waa kooxaha degaanka ee daryeel bixiyayaasha caafimaadka. Waa dhakhaatiir, la taliyayaal, kalkaalisooyin, dhakhaatiirta ilkaha iyo kuwo kale oo si wadajir ah uga wada shaqeeya bulshadaada dhexdiisa. CCO waxay xaqiijsaa in xubnaha ka tirsan OHP ay caafimaad ku sugnaadaan.

Kaar Furan: Haddii xubintu uusan lahayn CCO, wuxuu leeyahay kaar furan 'open card'. Wuxuu arka karaa daryeel bixiyayaal kasta oo qaata caymiska Qorshaha Caafimaadka Oregon.

Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP): Barnaamijka taageerada caafimaadka ee Oregon. Waxay ka caawisaa dadka dakhligoodu hooseeyo in ay helaan daryeel.

Daryeel Bixiyaha Aasaasiga ah (PCP): Xirfadlaha caafimaadka ee daryeela caafimaadkaaga. Kani sida caadiga waa qofka ugu horeeya ee aad soo wacdid marka aad qabtid dhibaatooyin caafimaad ama u baahan tahay daryeel.

OHA 4329 (09/2022) Somali

Oregon Health Authority

Sidee baan u adeegyada dabacsan ugu codsan karaa naftayda ama xubin ka tirsan qoyska?

Si aad u codsato adeegyada dabacsan, wac lambarkaaga adeega xubnaha CCO ama buug-gacmeedka xubnaha CCO ka fiiri macluumaad dheeraad ah. Lambarrada telefoonka ee adeega xubnuhu waxay ku qoran yihiin kaarkaaga OHP ama website-ka CCO ee OHA. Buug-gacmeedyada xubnuhu waxay ku jiraan website-kaaga CCO.

Waxaad sidoo kale awoodi kartaa in aad codsato adeega dabacsan adiga oo adeegsanaya daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah.

Sidee loo gaaraa go'aanada lagu ansixiyo ama lagu diido adeegyada dabacsan?

Go'aanada lagu ansixiyo ama lagu diido codsiyada adeegyada dabacsan waxaa loo gaaraa iyada la eegayo hab ku saleysan xaalada CCO kasta. Rafcaan kama qaadan kartid adeeg dabacsan oo la diiday, laakiin waxaad gudbin kartaa cabasho.

- Buug-gacmeedkaada xubnaha CCO ayaa leh macluumaad ku saabsan samaynta cabasho.
- Waxaad sidoo kale cabasho u gudbin kartaa Adeegyada Macmiilka OHP adiga oo wacaya 800-273-0557 ama foomka cabashada ka buuxinaya website-ka Cabashooyinka Xubnaha ka tirsan OHP.

Waa maxay qaarka mid ah tusaalooyinka adeegyada dabacsan?

Hoosta waxaa ku qoran tusaalooyinka adeegyada dabacsan ee ay dhici karto in ay CCO bixiso. Kani ma aha liiska dhammeystiran ee wax kasta oo ay dhici karto in ay CCO bixiso.

- Taageerooyinka cuntada, sida cuntada la isku keenayo, foojarada cuntada, ama cuntooyinka caafimaad ahaan ku habboon
- Taageerooyinka guriga ee muddada-gaaban, sida lacagta la iska sii dhigo ee ijaarka si la iskaga taageero kharashyada guuritaanka, teegaarada dhanka ijaarka ee loogu talagalay waqti yar oo gaaban, ama dejinta khidmadaha adeega 'utility'
- Guryaha ku meel gaarka ah ama hoy inta laga soo kabanayo isbitaal la is dhigay
- Waxyaabaha taageera hab-dhaqanka caafimaadka leh, sida kabaha ciyaaraha ama dhar
- Telefoonada gacanta ama qalabka gacanta ee loogu talagalay telehealth ama app-ka caafimaadka
- Waxyaabaha kale ee kaa dhiga in aad caafimaad qabto, sida qaboojiyaha hawada ama sifeeyaha hawada

Oregon Health Authority

Miyaa CCO-yada looga baahan yahay in ay bixiyaan adeegyo dabacsan?

In kharash lagu bixiyo adeegyada dabacsan waa mid ikhtiyaari ah, markaa CCO-yada loogama baahna in ay bixiyaan adeegyo dabacsan.

Ilaha kale

Haddii aad ka tirsan tahay OHP oo wax dhibaatooyin ah ku qabto helitaanka daryeelka, fadlan la xiriir barnaamijka Barnaamijka Mas'uulka Wax u dooda ee OHA. Waxaad ka wici kartaa oo farriin ugu dhaafi kartaa Barnaamijka Mas'uulka Wax u dooda 877-642-0450 ama email u dir oha.ombudsoffice@odhsoha.oregon.gov. Mas'uulka Wax u dooda wuxuu u doodaa xubnaha ka tirsan OHP wuxuuna sameyn doonaa in uu intii karaankiisa ah
ku caawiyo.

Ilo kale oo loogu talagalay taageerooyinka iyo adeegyada ka jira bulshadaadu waa 211 Info. Wac 2-1-1 ama booqo website-ka 211 Info wixii caawimaad ah.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjubaan. Taageeradani waa lacag la'aan. Wac 800-699-9075 ama TTY 711. Waan aqbalnaa wicitaanada gudbinta.

Oregon Health Authority